

## **Australiyaanka ka soo jeeda Afrika: Warbixinta xuquuqda aadanaha iyo ka mid noqoshada bulshada – Xaashida wada hadalka oo kooban**

### **Waxaan doonaynaa in aan ogaano waxaad u malaynayo**

Waxaan doonaynaa in aan maqalo sheekooyinka la xiriira xuquuqda aadanaha iyo degitaanka ama la qabsiga nolosha ee Australiyaanka ka soo jeeda Afrika oo kala jooga dafaha Australia.

Waxaan doonaynaa in aan maqalo fikradaada ku saabsan waxa loo baahan yahay in la bedelo si loo sahlo in Australia la dego ama lala qabsado.

Waxaan u isticmaali doonaa fikradaada xagga soo saarista warbixinta ugu dambaysa. Waxaan rajaynaynaa in warbixinta ugu dambaysaa ay saamayn ku yeellato dadka iyo ururada sameeya go'aanada isla markaana bixiya adeegyada, kana caawina bedelida aragtida dadka kale oo Australiyaanka ah oo ku saabsan bulshada Afrikaanka.

### **Maxay qabanaysaa xaashida wada-hadalku?**

Waxay bixisaa maclummaad waxayna weydiisaa dadka Afrika ka yimid (iyo qof kasta oo kale oo danaynaya) inay noo sheegaan sheekadooda, arrinta haysata iyo waxay dareen ka qabaan.

### **Maxaad oran kartaa?**

Waaya-aragnimadaada iyo aragtidaadu waxay naga caawin kartaa isku duba-ridida arrimaha ka mid noqoshada bulshada iyo xuquuqda aadanaha ee bulshooyinka Australiyaanka ah ee ka yimid Afrika.

Waxaanu weliba doonaynaa in aan adiga kaa maqalo wixii ku saabsan waaya-aragnimadaada Australia ee dhinacyada shaqada iyo tababarka; waxbarashada; caafimaadka iyo samaqabka; guriyeenta; nadaamka sharciga iyo cadaalada. Wuxuu kaloo noo sheegi kartaa arrin kale oo kasta ama dareen kale oo kasta oo aad qabto.

### **Sidee noogu sheegi kartaa sheekadaada?**

- Imaw kulanka iyo kooxaha aanu qabanqaabin doono (dadka qaarkiis ayaa heli doona turjubaano caawima si aad qayb uga qaadato)
- Soo gudbi qoraal adiga oo soo qoraya (arag maclummaadka hoose)

### **Xaggee ka heli kartaa wixii kulamada ku saabsan?**

- Shabakadaha bulshada ayaa ku caawimi doona si aad maclummaad u hesho
- Jadwalku wuxuu ku qornaan doonaa websaytkayaga: [www.humanrights.gov.au/africanaus](http://www.humanrights.gov.au/africanaus) laga bilaabo 16ka Maars 2009 (isaga oo Ingiriis ku qoran)

## **Yaa na caawimaya?**

**Mashruucu waa mid ku salaysan bulshada** waxaana caawimaya Guddi-wareegto ah iyo Kooxda Tixraaca Qaranka (Steering Committee and national Community Reference Group). Guddiga wareegtada ah waxay leeyihiin laba qof oo bulshada ka socda kuwaas oo kala ah: Samia Bahi, Agaasimaha Guud ee Xarunta Dumarka African – Australian iyo Abeselom Nega, Madaxa Golaha Bulshooyinka ah Afrikaanka ah ee Midoobey; iyo wakiilka adeeg bixiyaha Eugenia Tsoulis, Agaasimaha Guud ee Xarunta Awoodgelinta Soogalootiga Koonfurta Australia.

La tashiga qaran waxaa xiriirinaya hay'ada loo yaqaan Myriad Consultants.

**Kuwa kale ee qaybta ka qaata waxaa ku jira:** Adult Multicultural Education Services (AMES) in Victoria; Australian Red Cross; Diversity Health Institute; and the Australian Government Department of Families, Housing, Community Services and Indigenous Affairs (FaHCSIA).

### **Sida lagu soo gudbiyo qoraalka**

Haddii qoraalkaagu ku qoran yahay Ingiriis waxaan doonaynaa inaad email noogu soo dirto: [africanaus@humanrights.gov.au](mailto:africanaus@humanrights.gov.au)

Haddii aadan email noogu soo diri karin, ama qoraalkaagu ku qoran yahay afkaaga, noogu soo dir:

*African Australians project submission*  
 Race Discrimination Unit: Education and Partnerships Section  
 Australian Human Rights Commission  
 GPO Box 5218  
 Sydney NSW 2001

Ama ku soo dir fakiska ah: (02) 9284 9849.

### **QORAALKU WUXUU XIRMAYAA: 30 Juun 2009**

#### **Qarsoodi**

Qoraallada waxaa loo tixgelinaya dukuminti dadweyne ahaan haddii aadan noo sheegayn in qoraalkaaga laga dhigo qarsoodi. Fadlan noo sheeg haddii qoraalkaagu yahay qarsoodi.

### **Sidee ku helli karaa macluumaad intaas ka badan?**

- Haddii Ingiriisku aanu ahayn luqadaada ugu horraysa fadlan weydiiso xubnaha kale ee bulshada inay kaa caawimi karaan
- Gal websaytka: [www.humanrights.gov.au/africanaus](http://www.humanrights.gov.au/africanaus)
- Email ku dir su'aallahaaga: [africanaus@humanrights.gov.au](mailto:africanaus@humanrights.gov.au)
- Naga soo wac halkan wixii su'aalla (02) 9284 9600 ama 1800 620 241 (TTY)

### **Ma la kulantaa takoorid?**

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan xuquuqdaada xagga sharciga takoorida:

- Gal [www.humanrights.gov.au/complaints\\_information/index.html](http://www.humanrights.gov.au/complaints_information/index.html)

- Gal [www.humanrights.gov.au/about/languages/index.html](http://www.humanrights.gov.au/about/languages/index.html) (haddii aanu jirin qoraal afkaaga ku qoran, waxaanu kuu qabanqaabin karaa mutarjum si aad uga hadasho dacwadaada, fadlan wac, fadlan na soo wac)
- Lacag la'aan ku wac **Adeega Afcelinta iyo Tarjumida Qoraalka (Telephone Interpreter Service)** telefoon 131 450, sheeg afkaaga dabadeedna weydiiso Guddiga Xuquuqda Aadanaha Australia (Australian Human Rights Commission) tel: 1300 656 419
- Wac khadka dacwada 1300 656 419